2 Sharciga Ilaalada Ilmaha iyo Qoyska

SHARCIGA QOYSKA EE DUMARKA EE ONTARIO

Dhamaan Dumarka. Sharciga Hal Qoys.

Waxaad barataa xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Sharciga Ilaalada Ilmaha iyo Qoyska

Buugyradani waxaa loogu talo galay in uu fahan aas aas ah kaa siiyo arrimaha sharciga. Ma badalayo talo iyo kaalmada shakhsi ahaaneed ee sharci. Hadii aad la tacaalayso arrimo sharci, talo sharci sida ugu dhakhsaha badan waxaad u ilaalisaa xuquuqdaada. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan helitaanka iyo siinta kharashka looyarka sharciga qoyska, waxaad ka eegtaa buuga "Finding Help with your Family Law Problem" oo ku jira websaytka www.onefamilylaw.ca.

Ontario, *Sharciga Adeegyada Ilmaha, Dhalinyarta iyo Qoyska* ("*CYFSA*") waa sharci kaas oo u taagan danaha, ilaalida iyo badqabka caruurta.

CYFSA waxay aqoonsataa adeegyada ilaalada caruurta ee badhtanka u yahay ilmuhu. Adeegyada lagu ilaalinayo caruurta waa in laga eegaa qorshaha ugu khalkhal yar ee ficilka oo diirada lagu saaraa sidii loosii wadi lahaa xasiloonida deegaanka ee ilmaha.

CYFSA sidoo kale waxay aqoonsan tahay nidaamka midab takoorka iyo faquuqa ee ay tahay in laga jawaabo. Dhamaan adeegyada caruurta iyo qoysaska waa inay qadariyaan kala duwanaanshaha iyo xuquuqda bilaa aadanka, oo lagu eegaa qoomiyada, dhaqanka, jinsiga, iyo habdhaqanka shakhsiyada ee ilmaha.

Deeqda dawlada ee hay'ada samofalka ilmaha waa inay gacan ka gaystaan ilaalinta baahiyaha ilmaha 18 jirka kayar. Hay'adahan badanaa waxaa loo yaqaan Children's Aid Societies (Bulshada Samofalka Caruurta, CAS) ama Adeegyada Ilmaha iyo Qoyska. Kaalinta CAS waa inay baadho wixii eedeyn ah ee tacadi ah, inay bixiso tilmaamo, inay la shaqayso qoysaska inay wada joogaan, iyo mararka ay xaaladu aad u daran tahay, inay caruurta ka kaxayso gurigooda. CAS waxay siisaa daryeel caruurta iyo dhalinyarta, meel ay ku helaan daryeelka korin iyo cid korsada, oo waxay siisaa qoysaska taageero.

Waalid ahaan, waajibaadkaaga sharci waa inaad ka ilaaliso ilmahaaga waxyeelo oo aad bixiso baahiyahooda aas aasiga ah ee cuntada iyo hoyga. Hadii CAS ay jirto sabab ay u aaminsan tahay in aanad taas samaynaynin, waxay baadhi kartaa qoyskaaga.

CAS waa inay raacdaa shuruuc gaar ah iyo nidaamyo si ay u go'aamiso hadii ilmuhu uu **u baahan yahay ilaalo.** Kadib marka ay CAS dhamaystirto baadhitaanka, waxay go'aamin doontaa talaabada xigta waxay tahay. CAS waxay go'aamin kartaa inaan loo baahnayn inay arrinta qoyskaaga sii wadaan ama waxay u gudbin kartaa hay'ada bulsho oo taageero.

Hadii CAS ay u aragto in ilmuhu uu u baahan yahay ilaalo, oo guri dhaxdiisa aan lagu ilaalin karin ilmaha, waxaa ilmahaaga laga kaxayn karaa gurigaaga oo waxaa loo gayn karaa qoyska, xubno bulsho, ama daryeelka korinta dawlada.

Maxay ka dhigan tahay "u baahan kaalmo"?

CYFSA waxay ku sheegtaa marka ilmuhu u baahan yahay ilaalo. Waxaa kamid ah taas hadii isaga ama iyada:

- kaligii laga tago, aan la daryeelin ama la dayaco;
- lagu tacadiyay ama ay u badan tahay in lagu tacadiyo;
- uu arko tacadi ama dagaal u dhaxeeya dadka waawayn ee guriga.

Tacadiga waxaa kamid ah mid jidheed, galmo iyo tacadiga dareenka. Sida ay dhigayso *CYFSA*, daryeelaha waxaa kamid ah qof kasta o wayn oo ka masuul ah daryeelka ilmaha. Waalidka uu doono ayuu noqon karaa ama daryeele kaas oo gaystay tacadiga. Xataa hadii aanad ku tacadiyaynin ilmaha, CAS waxay baadhi kartaa

hadii aad wax ka ogayd tacadiga, ama ay ahayd inaad wax ka ogaado, oo aanad isku darin inaad joojiso.

Sida *CYFSA* ay dhigayso, ilmaha waxaa lagu sheegaa qofka ka yar 18 jir. Laakiin, marka ay CAS gacanta lasoo gadho ilmo kaas oo ah 16 ama 17, ilmaha waa inuu ogolaadaa (ogolaanshe) oo iskii u ogolaadaa. 16-17 lagama kaxayn karo guriga iyada oo aanu ogolaan ilmuhu.

Sidee ayay CAS qoysaska gacanta ula soo geli kartaa?

Qof kasta oo u arka inuu ilmuhu u baahan yahay ilaalo waa inuu u sheegaa CAS. Tan waxaa loo yaqaan **warbixinta waajibka ah**.

Qof kasta oo la shaqeeya caruurta waa inuu lasoo hadlaa CAS hadii uu ka shakiyo in ilmaha kayar 16 jir lagu tacadiyay ama la dayacay. Taas waxaa kamid ah macalimiinta, dhakhtarada, shaqaalaha bulshada, hogaamiyayaasha diinta iyo shaqaalaha meelaha caruurta maalintii lagu hayo. Hadii ayna u sheegin CAS, waxaa lagu soo oogi karaa dacwad fal danbi.

Hadii ilmaha uu yahay 16 ama 17 jir, xirfadluhu waxa uu go’aansan karaa hadii uu tacadiga doonaayo inuu wargeliyo CAS iyo in kale. Maaha waajib in laga warbixiyo da’dahan.

Waajibaadka ka warbixintu waa mid **joogto ah.** Tani waxay ka dhigan yahay marka uu qofku wakhti hore ka war bixiyo tacadiga, waa inay wakhti kasta ka war bxiiyaan markaas oo loo arkayo in ilmaha lagu tacadiyay ama la dayacay.

Waxaad sidoo kale la hadli kartaa CAS laftaada wixii kaalmo ah.

Tacadiga Guriga Dhaxdiisa iyo CAS

Hadii lagugu tacadiyay oo bilayska lala hadlay, CAS ayaa sidoo kale lala hadli kartaa si ay guriga u timaado. Mararka qaar dumarka lagu tacadiyay waxaa baadhitaan ku samaysa CAS. CAS waxay u samaysaa taas maadaama oo ay walaac ka qabto tacadiga qofka wayn inuu saamayn karo badbaadada ilmaha iyo badqabkiisa. Danaha ilmaha ayaa diirada lagu saarayaa baadhitaanka CAS.

Hadii shaqaalaha CAS ay yimaadaan gurigaaga, waxay su'aalo waydiin doonaan adiga iyo ilmahaaga. Shaqaaluhu waxa uu sidoo kale la hadli karaa lamaanahagaa oo uu kala hadlayaa tacadiga.

Hadii CAS u aragto in aanad samaynaynin waxay ahayd inaad samayso si aad uga ilaaliso ilmahaaga waxyeelada, waxay kaa qaadi karaan ilmahaaga xataa hadii aanad ahayn qofka tacadiga gaysanaya. Waxaa aad muhiim u ah inaad kala hadasho looyar si aad u ogaato waxa ikhtiyaarka ugu wanaagsan yahay.

Sidee ayay wax noqonayaan marka CAS ay gacanta lasoo gasho?

Talaabada 1: Baadhitaan Hordhac ah

Marka uu qof lasoo hadlo ama uu warbixin soo gaadhsiiyo CAS, shaqaalaha ilaalida ilmaha ayaa samayn doona baadhitaan hordhac ah. Tani waxay ka dhigan tahay in shaqaalaha ilaalada ilmuhu uu qaadi doono talaabooyin uu ku eegayo warbixinta si loo go'aamiyo hadii CAS loo baahan yahay inay gacanta lasoo gadho qoyska. Mararka qaar CAS waxay go'aansan kartaa in aan loo baahnayn inay wax talaabo dheeraad ah qaado wixii intaa ka danbeeya maadaama oo ay ku qanacday in ilmaha si wanaagsan loo daryeelay. Shaqaalaha ilaalda ilmaha

waxa uu sidoo kale qoyskaaga ku xidhi karaa adeegyada uu heli karo ee bulshada dhexdeeda.

Talaabada 2: Baadhitaan

Kadib baadhitaanka hordhaca ah (Talaabada 1), CAS waxay go'aamin kartaa inay samayso baadhitaan. Hadii ay taasi dhaxdo, CAS waxay soo booqan doontaa gurigaaga oo adiga, lamaanahaaga iyo ilmaha ayay idinla sheekeysan doontaa. CAS waxay sidoo kale waraysan kartaa dad ka baxsan gurigaaga sida xubnaha kale ee qoyska, macalimiinta, dhakhaatiirta ama jaarka.

Waa wax wayn inay ku baadho CAS. Hadii aanad ka jawaabin walaacooda, CAS waxaa dhici kara inay aad gacanta ula soo gadho oqyska maadaama oo ay doonayaan inay ilaaliyaan badbaadada ilmaha. Waxaa muhiim ah in la qaado talaabooyin lagu muujinayo inay gacan siinayso wixii dalab ah ee macquul ah ee ka yimaada CAS oo aad isku daydo inay la tacaasho mushkilada. Laakiin, waxaad xaq u leedahay inaad la hadasho looyar hadii aad u baahato kaalmo sharci.

Dhamaadka baadhitaanka, CAS waxay go'aamin kartaa in ilmahaagu aanu u baahnay ilaalo. Hadii ay taasi dhaxdo, wax talaabo dheeraad ah qaadi maayaan.

Talaabada 3: Heshiiska Adeega ama Helitaanka Maxkamada

Hadii ay CAS go'aamiso in ilmahaagu uu u baahan yahay ilaalo, waxay qaadi doontaa talaabo ay ku sugayso in ilmuhu uu bad qabo. TTalaabadaas waxaa kamid noqon kara inaad la shaqayso qoyska wixii maxkamada ka baxsan (ikhtiyaar) si mushkilada looga jawaabo si ilmahaaga uu gurigaaga u joogo

Badanaa marka CAS ay qoyska maxkamada banaankeena qoyska laga shaqaynayso, waxay ka

dalbataa inay saxeexaan **heshiis adeega oo ikhtiyaar ah** oo ay ku jiraan talaabooyinka ay qaadi doonaan si ay u xaqiijiyaan in ilmuhu uu badbaado qabo.

Heshiiska adeega ikhtiyaarka ah waxaa kamid ah noqon kara inaad ogolaato adeegyada sida booqashooyinka guriga, duruusta waalidka, latalin ama shaybaadhka mukhaadaraadka.

CAS waxay sidoo kale kaa dalban kartaa inaad saxeexdo **heshiis daryeelka kumeel gaadhka ah**. Tani waxay u ogolaanaysaa CAS inay ilmaha daryeesho oo ay gacanta ku haysto ilaa 6 bilood. Ilmaha ka wayn 12 waa inuu ogolaadaa heshiiskan.

Hadii lagaa dalbaday inaad saxeexdo heshiiska adeega ikhtiyaarka ah ama heshiiska daryeelka kumeel gaadhka ah, waxaa aad muhiim u ah inaad hesho talo sharci kahor inta aanad saxeexin. Hadii aanad heli karin talo sharci kahor inta aanad saxeexin, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah u heshaa talo sharci.

Hadii aad u baahan tahay turjubaan wakhtiga aad la kulmayso CAS, waa inaad taas isla markaba u sheegtaa. Hadii aad u baahan yahay wax kaalmo dheeraad ah oo banaanka ah, sida in qof taageero kuu ah uu kula joogo kulanka, waa inaad sidoo kale u sheegtaa CAS.

CAS waxay ilmahaaga ka kaxayn kartaa guriga hadii aad saxeexdo heshiiska laakiin aanad raacin.

Kadib marka aad saxeexdo heshiiskan, CAS waxay gacanta kulasii jiri doonaa qoyskaaga si ay u xaqiijiso in ilmahaagu uu badbaado qabo oo si wanaagsan loo daryeelo iyo inaad raacayso heshiiska.

Ka Kaxaynta Ilmaha

CAS waxay saari kartaa, ama ka kaxayn kartaa, ilmahaaga guriga hadii la go'aamiyo in ilmahaagu u baahan yahay ilaalo oo ayna jirin qaab kale oo ilmaha badbaadadiisa lagu sugayo.

Hadii ay taasi dhacdo, waxaad heshaa kaalmo sharci ah sida ugu dhakhsaha badan.

CAS waa inay ku tagtaa maxkamada shan maalmood gudahood kadib marka ay ilmahaaga guriga ka kaxayso. Tan waxaa loo yaqaan **imaatinka kowaad** ee **dhagaysiga ilaalada ilmaha.**

Waa inaad doonataa kaalmo sharci iyo cid ku matasha sida ugu dhakhsaha badan kadib marka ilmahaaga lagaa qaado. Caadiyan imaatinta kowaad, hadii waalidku aanu la imaan looyar iyo cadaymo, maxkamadu waxay soo saari kartaa amar hordhac ah oo ku salaysan cadayma CAS, waxayna kiiska balamin doontaa taariikh danbe si uu waalidku looyar usoo kaxaysto.

Waa inaad looyar sida ugu dhakhaha badan usoo kaxaysataa. Waxay kaala hadli doonaa sida aad u balansan karto kiiskaaga wixii dhagaysi ah si aad markaa sheekada dhinacaaga uga sheekeyn karto.

Hadii aynaad heshiin karin adiga iyo CAS oo ku saabsan meesha ilmahaagu uu joogayo, waxaad xaq u leedahay inaad hesho dhagaysi (dacwad). Waxaa jirta shan shay oo macquul ah inay kasoo baxaan dacwada.

- **Meesha ka saarid** waxay ka dhigan tahay inay maxkamadu go'aamiso in ilmahaagu aanu u baahnayn amar ilaalin.
- **Amarka Kormeerka** waxay ka dhigan tahay in ilmuhu uu guriga ka loojo waalidka, qoyska ama xubinta bulshada, laakiin CAS ay gacanta lasoo

gadho oo ay kormeerto. Waxaa jiri kara shuruudo iyo xeerarka qaar ay tahay in daryeeluhu uu raaco.

- **Daeryeelka Bulshada Kumeel Gaadhka ah** waxay ka dhigan tahay in ilmaha la armay inuu mudo xadidan ay CAS (waalid koriya) gacanta ku hayaan.
- **Daryeelka Bulshada Dheeraadka ah** waxay ka dhigan tahay in ilmahaagu uu noqdo mid si rasmi ah loogu wareejiyo CAS oo la koriyo.
- **Amarka Korinta** waxay ka dhigan tahay in waalidka, qaraabada ama xubin bulshada ah lagu wareejiyo ilmaha si ay u koriso.

CYFSA waxay diirada saaraysaa muhiimiyada in ilmaha ay qaraabadiisu gacanta ku hayso hadii aanu ilmuhu ku noqon karin waalidkii.

Hadii ay tahay in ilmahaaga laga kaxeeyo guriga, waxaad dalban kartaa in ilmahaaga lagu wareejiyo xubin qoyskaaga ah ama asxaabtaa. CAS waa inay samaysaa qiimayn guriga ah ee qofkan ah si ay u ogaado hadii ay daryeeli karaan ilmaha.

Hadii aanu jirin cid ku munaasab ah oo ilmuhu uu la joogi karo, CAS waxay baadhi doontaa cid korisa ama guri kooxeed.

Tacadiyada qaar aaya sidoo kale danbi ah. Xafiisyada CAS waxay leeyihiin xeerar dhigaya in ay tahay in la gaadhsiiyo bilayska wakhti kasta oo uu qofka u sheego tacadiga jidhka iyo tacadiga galmada. Bilaysku waxay baadhi doonaan tacadiga oo waxay dhigi doonaan dacwada faldanbiyeedka. Kiiska faldanbiyeedka waxa uu noqon doonaa mid dheeraad ah oo dhagaysiga ilaalada ilmaha ah. Dacwada faldanbiyeedka ah meesha kama saarto kiiska ilaalada ilmaha. Hadii lagugu soo

oogo dacwad fal danbiyeed talo sharci ka heshaa looyar faldanbiyeedka ah isla markaba.

Ka Qaadida Marka Uu Dhasho

CAS waxay ay qaadi kartaa ilmaha marka uu dhasho hadii ay jirto walaac aad u wayn oo ilaaladaada badbaadada ilmahaaga ah. Si lamid ah wakhtiyada kale oo kale, CAS waa inay leedahay walaac cad oo ay talaabadan u qaaday.

Tusaale ahaan, CAS waxay u badan tahay inay walaac ka qabto badbaadada ilmahaaga hadii:

- caruurtaada hore ay kaa qaaday CAS;
- aad leedahay mushkilad aad u daran oo balwada mukhaadaraadka iyo khamrida ah;
- aanad haysan guri ama aad degan tahay meel aan badbaado ahayn; ama
- waali kale, oo ay ku jiraan walaac caafimaadkaaga dareenka iyo maskaxda.

Guudmar

Nidaamka ilaalada ilmaha ama dhagaysigu waa mid aad u murugsan. Si dhakhsi ah ayay u socdaan. Hadii ilmahaaga la qaado, CAS waa inay kiiska ku horgaysaa maxkamada shan maalmood gudahood.

Waxaa sidoo kale uu sharci aad u xadiday mudada uu ilmuhu ku jirayo daryeelka korinta dawlada si kumeel gaadh ah. Wixii ilmo kayar ah 6 sano jir, wakhtiga ugu badan waa 12 bilood. Wixii ilmo ee ah 6 sano jir ama kawayn, wakhtiga ugu badan waa 24 bilood. Marka la gaadho wakhtiga loo asteeyay, maxkamada waa inay ilmaha ku celisaa waalidkii, bulshada ama xubin

qoyskaga ah, ama waa in ilmaha cid korisa loo diyaariyaa (si rasmi ah ayay cid u korin kartaa).

Waa taas sababta ay muhiim u tahay inaad dalbato kaalmo sharci wakhti hore oo aad awoodo, si aad u fahmi kartid inaad u baahan tahay in ilmahaaga lasoo celiyo.

Hadii ilmahaaga ay kaa qaado CAS, waxaad doonataa kaalmo sharci isla markaba. Waxaad xaqiijisaa in aad hesho looyar kaas oo khibrad ku leh sharci ilaalinta ilmaha. Waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo la hadlaya Legal Aid Ontario ama Justice Net.

Ontario

The Law Foundation of Ontario
Building a better foundation for justice in Ontario

Hadii aad tahay gabadh Faransiis ku hadasha oo degan Ontario, waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada luuqada Faranaisiiska intay socoto dacwada maskamada sharcigu. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xidhiidh looyar, xarunta sharciga bulshada, ama khadka taageerada Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka ogaan kartaa sida loo heleyo adeegyada Faransiiska websaykeena www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Sharciga Qoyska ee La Heli Karo*

1. Sharciga Qoyska aiyo Xalinta Muranka Dheeraadka
2. **Sharciga Ilaalada Ilmaha iyo Qoyska**
3. Taageerada Ilmaha
4. Sharciga Qoyska iyo Fal Danbiyeedka
5. Haynta iyo Helitaanka Ilmaha
6. Xidhiidhada Guriga Dhaxdiisa
7. Xadhiga Sharciga Qoyska
8. Arrimaha Sharciga Qoyska ee Soo Galaytiga, Qaxooga iyo Dumarka Aan Xaalada Lahayn
9. Helitaanka Kaalmada ee Mushkilada Sharciga ee Qoyskaaga
10. Sida Hantida Loo Qaybiyo Sharciga Qoyska
11. Guurka iyo Isfurka
12. Taageerada Xaaska

** Buuga waxaa lagu heli karaa qaabab kala duwan Fadlan ka eeg www.onefamilylaw.ca wixii macluumaad dheeraad ah. Waxaad sidoo kale waxyaabo dheeraad ah ka heli kartaa websaytkeena si ay kaaga caawiso inaad fahanto xuquuqdaada sharciga qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Funded by:/Financé par:
Ontario